DUGSIYADA DADWEYNAHA BOSTON

Boston Public Schools

## Hawlqabadyo CUSUB

# CADAYNTA HOYGA

**Kahor intaan ardayna lagu qorin ama loogu yeerin gelida Dugsi Dadweynaha Boston,waalidka ama koriyaha idman* ee ardaygu waa inuu cadeeyaa hoygooda sharciyaysan ee Magaalada Boston.** Qoysaska meesha ay ku noolyihiin ka baxsan tahay Boston uma qalmaan gelida Dugsiyada Dadweynaha Boston.

**Laga bilaabo Julay 1, 2004**, codsadeyaalka oo dhan waa inay keenaan **sadex cadaymood ee hoygooda**.

Xaanshiyuhu waa inay ahaadaan kuwo la daabacay oo ay ku qoran yihiin magaca iyo cinwaanka waalidka ama koriyaha* ardayga lana keenaa **Xarunta Waxtarmada Waalidka** waqtiga diiwaangelinta.

Isla waraaqahaas oo kale ayaa la rabaa marka **bedelaada cinwaanka**.

Codsadeyaalka oo dhami waa inay keenaan ugu yaraan **hal xaanshi midkood ee midba udubyada soo socda**:

| Udubka A | Udubka B | Udubka C |
|---|---|---|
| • Nuqul Lahaansho IYO qoraal bixinta haftadii ugu dabaysey<br>• Nuqul Heshiis Kiro (ay ka mid yihiin kuwa " BHA" iyo "HUD") **IYO** qoraal bixinta kiradii ugu dambaysey<br>• Cadayn sharciyaysan ee hantiilaha guriga xaqiijinaya kirayntiisa IYO qoraal kiro bixnta ugu dambaysey<br>• Heshiiska "Section 8" | *Biilka sahayfududaynta guriga (utility) ee ila 60 casho, ay ka mid yihiin*<br>• Biilka gaasta<br>• Biilka shidaalka kululaynta<br>• Biilka korontada<br>• Biilka telefanka guriga<br>• Biilka keebalka telefishanka | • Ruqsad dareewalnimo sharci ah<br>• Diiwangelin baabuur ee hadda<br>• Aqoonsi sawir leh ee Massachusetts<br>• Baasaboor sharci ah<br>*Taariikhaysan ila sanadkii hore:*<br>• Arjiga W-2 ee cashuurta<br>• Biilka cashuurta baabuurka<br>• Biilka cashuurta hantida<br>*Taariikhaysan ilaa 60 casho:*<br>• Warqad ka timid hay'ad dawleed ee jirta<br>• Dacalka dambe ee mushaharka<br>• Xisaabcelinta banki ama "credit card" |

** Korinta sharciyaysan waxa laga rabaa warqado dheeraad ah ee maxkamad ama hay'ad dawladeed.*

Nidaamka cadaynta hoyga ma khuseeyo ardayda gurilaawaha ah.

**Wixi war dheeraad ah ee Guddiga Dugsiyada Boston xagga nidaamka cadaynta hoyga:**
**www.bostonpublicschools.org/residency**
☎ 617-635-9014

**Soo sheeg hoyga beenta ah!** Wac khadka kadigida dahsoon ee cadaynta hoyga: 617-635-6775.

*Maajo 5, 2004*